

Ma iga caawin kartaa Qaybta-8aad (Section 8) ama Foojarrada Guryaynta ee Mashruuca Ku salaysan?

King County Regional Homelessness Authority (Maamulka Maaraynta Hoy la'aanta Gobolka King) ma bixiyo guryo mana bixiyo adeegyada guriyaynta ee Section-8 ama Foojarrada Guryaynta Mashruuca Ku Salaysan. Haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan foojarrada guryaynta, fadlan la xidhiidh:

King County Housing Authority (KCHA)

(206) 574-1100

kcha.org

Seattle Housing Authority

(206) 615-3300

seattlehousing.org

Renton Housing Authority

(425) 226-1850

rentonhousing.org

Goobaha Kala Aad La xidhiidhi karto

Washington State 2-1-1

Wac 2-1-1 or (800) 621-4636

Khadka Qoysaska Qabo Bahida Guryaynta

(206) 245-1026

Goobaha Caawinta Adeegyada Guryaynta Ee Isku dhafan

- **Seattle**
(206) 328-5900
- **Koonfurta King County – Federal Way**
(253) 874-6718
- **Koonfurta King County – Renton**
(425) 523-1377
- **Bariga King County – Bellevue**
(206) 328-5900
- **Waqooyiga King County – Waqooyiga Seattle** (206) 694-6833

Adeegyada Gargaarka Degdega ah

KCRHA Ombuds (Wakiilka Caawinta Guryaynta) ma bixiyo adeegyo degdeg ah. Haddii aad wajahayso xaalad degdeg ah oo naftaada halis gelinaysa oo u baahan taageero caafimaad ama mid sharci fulineed, fadlan wac 911.

Haddii aad u baahan tahay taageero ku aadan caafimaadka maskaxda, isticmaalka mukhaadaraadka, ama dhibaatooyinka shucuureed, khadka taleefanka ee Taageerada Dhibaataada ayaa diyaar u ah in la waco 24/7. (206) 461-3222

Waxaan soo dhaweynaynaa qof kasta oo doonaya macluumaadka ku saabsan nidaamka ama adeegyada taageerida hoy la'aanta.

Nala soo xidhiidh:



Naga soo wac:
(206) 639-4601



Email noogu soo dir:
ombuds@kcrha.org



Taleefoonkaaga ku iskaan garee koodhka QR-ka ama nagu soo booqo barta internetka ee kcrha.org/ombuds si aad wax badan u ogaato



Xafiiska Ombuds (Wakiilka Caawinta Guryaynta)

Horumarinta Sinnaanta, Bixinta Adeegyada Macmiilka, iyo Isla- xisaabtanka ee Nidaamka Jawaab-celinta Hoyla'aanta ee King County

Diyaar baan u nahay in aan ku caawino!

Ma tahay macmiil ama Adeeg-bixiyaha adeegyada hoy la'aanta ee King County?

Ma u baahan tahay qof aad la wadaagto jawaab-celin, walaac, ama cabasho aad leedahay?

Ma caawin karnaa helidda adeegyada guryeynta ama howlaha la xidhiidha?

Ma tahay adeeg bixiye oo ma haysaa talooyin ku saabsan jawaab-celinta/horumarka?

Waa maxay Ombuds Office?

Waxaan ka shaqeynaa horumarinta isla-xisaabtanka nidaamka jawaab celinta hoy la'aanta annagoo bixinayna macluumaad, wax ka qabanayno cabashooyinka, baarayno tabashooyinka, oo la soconayno isbeddelada horumarka King County.

Sidee ayuu ii caawin karaa Ombuds Office? Waxaan:

- Bixinaa Fahamka la xidhiidha hoy la'aanta, bixinta macluumaadka, bixinta adeegyada la talinta iyo hagidda la xiriirta hoy la'aanta ee gudaha King County.
- Ka jawaab-celinaa su'aalaha iyo walaacyada ku saabsan adeegyada hoy la'aanta oo ka shaqaynaa sidii aad ugu xallin lahayn si aan rasmi ahayn
- Baarnaa cabashooyinka
- Qabanaa jawaab-celinta dadka hela adeeyada KCRHA ee ku saabsan adeegyada nidaamka hoy la'aanta
- Walaacyada bulshada u gudbinaa hoggaanka KCRHA, shaqaalaha, iyo maamulka.

Yaan u adeegnaa?

- Xubnaha bulshada ee helo adeegyada barnaamijka ay maalgeliso KCRHA
- Bixiyaasha Adeegyada ee ay maalgeliso KCRHA
- Shaqaalaha ama qandaraaslayaasha KCRHA

Maxaa dhacaya marka aad la xiriirto xafiiska?

Waxaan kula samayn doonaa dib u eegis hore, uruurinta macluumaadka, iyo qiimeynta si aan u go'aamino sida ugu wanaagsan ee aan wax uga qaban karno. Tani waxay qayb ka noqon karaa su'aal weydiin si loo helo faham wanaagsan. Si loo horumariyo adeegyadeena, kooxda Ombuds ayaa sidoo kale laga yaabaa inay ku waydiyaan su'aalo gaar ah si ay si wanaagsan u fahmaan bulshada aanu u adeegno.

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo

Ma xallin kartaa dhibaato ama cabasho kasta?

KCRHA's Ombuds Office ayaa dib u eegi karaa, baari karaa, oo xallin karaa arrimaha ku aadan afartan qaybood:

- **Adeeg Bixinta** - Adeegyada, agabyada iyo howlaha la siiyo dadka hoy la'aanta wajahaya
- **Maamulidda Barnaamijka** - Waajibaadka maamulleed ee KCRHA iyo adeeg bixiyayaasha qandaraaska ku jira oo ay ku jiraan maaraynta qandaraasyada, la socodka waxqabadka howlaha, u hoggaansanaanta shuruucda iyo xeerarka, iyo adeegga taageerada macaamiisha
- **Shuruucda** - Go'aamada, tallaabooyinka la qaado, borotokoolka, ama nidaamyada ay fuliso KCRHA ama adeeg bixiyaasha qandaraaska ku jira
- **Hawlaha kale ee ay maamusho KCRHA** - Oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn: Waajibaadka Daryeelka Taageerada Joogtada ah sida Isku-dubbaridka ama Nidaamka Macluumaadka Maareynta Hoyla'aanta (HMIS)

Ma inaan shalhsi ahaan oo fool ka fool ah ula kulmaa?

Maya. kullamada Ombuds ee qof ahaanta ah waa kuwo ikhtiyaari ah, laakiin looma baahna.

Sidee Ombuds u ilaalin doontaa asturnaantayda haddi xogtoodu tahay kuwo guud?

Ka urur dowladeed ahaan, waa in Ombuds Office ee KCRHA u hoggaansamaa Washington State's Public Records Act (Sharciga Diiwaanka Dadweynaha ee Gobolka Washington). Tani macnaheedu waxa waaye in diiwaannada Ombuds Office loo tixgaliyo sida diiwaannada guud, oo waxaa diiwaannadan codsan kara xubnaha bulshada, ilaa diiwaanka la codsado uu ku jiro macluumaad ka reeban ama ka mamnuuc ah in la shaaciyo.

Inkasta oo diiwaannada Ombuds Office ay heli karaan dadweynaha, waa mas'uuliyadda xafiiska in uu sida wanaagsan oo suurtagalka ah u ilaaliyo asturaanta. Ombuds Office ma shaacin doono aqoonsiga qof kasta oo la soo xidhiidhaya xafiiska si uu cabasho u gudbiyo, mana shaacin doono wax macluumaad ah oo lagu bixiyo si qarsoodi ah, marka laga reebo in uu wax ka qabto khatar dhaw oo dhaawac halis ah ama marka sharcigu u baahdo sidaan.

Ma soo gudbin karaa cabasho qarsoodi ah?

Haa, haddii aad rabto inaad soo gudbiso cabasho qarsoodi ah HA buuxin foomka onlaynka, ha soo dirin fariin qoraalleed, ama iimayl. Fadlan si toos ah noogu soo wac (206) 639-4601.